

Talaalka Inactivated(bakhti) Polio (IPV)

Talaalku (ama iraabku) waxa weeye sida ugu wanaagsan ee loogaga hor tegi karo cudurada khatarta ah. Ururka National Advisory Committee on Immunization waxa ay si adag isugu raaceen talaal joogto ah.

Talaalkani wuxuu caruurta iyo dadka waa-weyn ka ilaaliyaa qalalka. Talaalka polio-da waxa sharciyan looga baahan-yahay dhamaan caruurta aada dugsiyada Ontario (haddii aan laga dhaafin)

Waa maxay Polio-du(Qalalku)?

Polio-du waa cudur halis ah oo laga qaadi karo biyaha la cabo ama cunto ay la socoto baakteeriyada polio-du. Waxa kale oo laga qaadaa dadka qaba. Cudurku wuxuu dhaawici karaa dareemayaasha qofkuna curyaan ayuu noqon karaa noloshiisa. Wuxuu curyaaminkaraa muruqyada loo adeegsado neefsashada, hadalka, cunada iyo socodkaba. Sidoo kale waa lagu dhiman karaa.

Ilaa xad intee le-eg ayuu talaalka IPV ka hor tegi karaa qalalka?

Talaalku wuxuu boqolkiiba 99 ka difaaca dadka qaatay dhamaan talaaladoodii.

Goorma ayaa la isa siiyaa IPV?

IPV waxa la isa siin karaa keli-geed ama isaga oo la socda talaalo kale. Wuxuu ku jiraa talaalada isku jira ee caruurta dhalata la siiyo. Dhakhtarkaaga ayaa go'aamin doona talaalada aad u baahan-tahay.

Talaalkan joogto looma siiyo dadka waa-weyn. Keliya waxa la siiya dadka waa weyn ee la is lee yahay waxay la kulmi karaan jeermiska dhaliya polio-da. Dadkan waa-weyn waxa ka mid ah:

- Dadka u socdaala dalalka kale ee polio-da caadiyan lagu arko
- Shaqaalaha ka shaqeeya shay-baadhyada ee ku shaqaynaya waxyaabaha cudurada laga baadho sida dhiig wata jeermiska polio-da.
- Shaqaalaha caafimaadka ee xanaaneeya dad laga yaabo inay qabaan jeermiska polio-da.

Ma yahay talaalka IPV mid aan wax yeelo lahayn?

Haa. Dhibaatooyinka ka iman kara talaalkan polio-du (IPV) way fudud yihiin waxayna jiraan muddo yar oo maal-mo ah ka dib talaalka. Dadka qaar waxay yeeshaan xanuun yar, barar iyo meesha talaalka lagu muday oo casaata.

Maadaama oo talaalkani yahay mid bakhtiisan, dumarka uurka leh iyo dadka kaleba ka ma qaadi karaan qof muddo yar ka hor lagu muday talaalkan. **Waa inaad had iyo goor dhakhtarkaaga ka waraysato dhibaatooyinka iyo faa'iidooyinka talaalkasta.**

Goorma ayaan dhakhtarkayga la hadlaa?

La hadal dhakhtarkaaga haddii saddex maalmood gudahood talaalka kadib astaamahani soo baxaan:

- Caaro

- afka ama wejiga uu bararo
- neef qabasho
- midabka oo doorsooma qofkuna u ekaado siddii wax daan-daansan
- ama dhibaatooyin kale oo khatar ah aad ku aragto.

Yaa laga daayaa talaalka IPV?

Dhakhtarka ayaa go'aamin kara inaan qofka la siin talaalka IPV haddii uu qofku:

- leeyahy xumad badan ama cudur ka xun hargab
- uu xasaasiyad xun ka qaado antibiotics-ka loo yaqaan neomycin or polymyxin B
- uu xasaasiyad xun ka qaado talaalkan(anaphylaxis)
- uu xasaasiyad xun ka qaado qayb ka mid ah talaal-kan

Yaan la xidhiidhaa haddii aan su'aalo kale ka qabo talaalka IPV?

Wixii faah-faahin dheeraad ah la xidhiidh dhakhtarkaaga ama xarunta caafimaad ee kuugu dhow.

Diiwaan gelinta talaalada

Kadib marka ilmahaaga la talaalo, hubi in dhakhtarku "kaadhka jaalaha ah" ku diiwaan geliyo talaalka. Waxaad u baahan doontaa diiwaan gelintan inaad siiso rugtaada caafimaadka marka ilmuhu dugsiga bilaabay. Faa'iido ayey u leedahay qofka wayn in uu ogaado markii ugu dambaysay ee la talaalay si haddii uu kugu dhaco dhaawac talaalka tetanus u baahan ama aad u safrayso dal talaalka poliioda la isiga baahan yahay aad u la socoto talaalada aad qaadatay iyo kuwa aanad qaadan. Diiwaankaagan meel adag dhig!